

# Warbixin ku socota mas'uulka daryeelka carruurta ee ardayda dhigata dugsi xannaano iyo iskuul

2020-11-24

## Mas'uuliyiinta daryeelka carruurta ayaa u baahan iney sii kordhiyaan raacitaanka talooyinka xilliga xiriirka dugsigu xannaano iyo iskuulka

**Waxa muhima in qof kasta u hogaansamo waanooyinka iyo talooyinka hey'adda caafimaadka bulshada sida ugu suurta galka badan si loo yareeyo halista in la sii faafiyo cudurka covid-19. Tan ayaa si khaasa u khuseysa marka lala xiriirayo shaqaalaha haya howlaha xasaasiga u ah bulshada kuwaasoo aan si saa'ida ugu baahannahay.**

Waxaa bulshada ku sii dhex kordhaya faafka cudurka taasoo micnaheedu yahay iney saa'id muhim u tahay in la raaco talooyinka jira si looga hortago inuu cudurku sii faafo. Waxeynu mas'uuliyiinta daryeelka carruurta ku boorineynaa iney si gooni ah uga taxa daraan ugana foojignaadaan astaamaha cudurka ee iyaga iyo carruurtoodaba. Qofka dareema xannuun, xataa astaamo fudud, waa inuu joogo guriga oo uusan tagin shaqada, iskuulka, dugsigu xannaanada iyo goobaha kale ee howluhu ka socdaan. Waxeynu u baahannahay inaanu dhamaanteen gacan ka geysano sidii hoos loogu dhigi lahaa faafka cudurka.

### Tan ayaa khuseysa:

- **Ka soo kaxeeynta iyo geynta meel dibed ah**  
Waxeynu mas'uulka daryeelka carruurta ku boorineynaa inuu ilmaha meel dibedda ku wareejiyo, iyadoona xilliyadaa aan loo dhowaan shaqaalaha iyo mas'uuliyiinta kale ee daryeelka carruurta, in la iska ilaaliyo xiriirka jir ahaaneed iyo inaan la gelin dhismaha howluhu ka socdaan.
- Waxaad adiga ah mas'uulka daryeelka carruurta u baahan tahay inaad noqoto mas'uul isla markaana aad carruurtaada guriga ku heyso markey xannuunsadaan. Xataa haddii astaamuhu yihiin kuwo fudud.
- Haddii ilmahaaga lagu arko astaamo cudur iyagoo jooga goobta xannanada/iskuulka markaa shaqaalaha ayaa kaa codsan doona inaad ilmaha akaxeysato. Fadlan tixgeli arrintaa oo shaqaalaha ka ogolow taa.

Waxan ka taxadareynaa inaan cudurka lagu faafin carruurta kale iyo shaqaalaha.

- Hadduu ilmuhu qabay astaamaha wax ka badan 24 saac **waa in ilmuhu markaa guriga joogaa 7 cisho kadibna noqdaa mid caafimaad qaba oo aan qandhana laheyn labadii maalmood ee ugu danbeeyey** inta aanu dib ugu soo noqon dugsiga xannaanada ama iskuulka.
- Carruurta ka joogtay dugsiga xannaanada ama iskuulka 7 cisho infakshan dartii kadibna caafimaad iyo firficoonaan helay waxey ku noqon karaan dugsiga xannaanada ama iskuulka xataa haddii ay ku hareen calaamado fudud sida diif yar ama qufac.
- Marar badan si wanaagsan ugu meyr saabuun iyo biyo gacmaha. Kala hadal ilmahaaga muhida ay leedahay in la badiyo meyrashada gacmaha.
- Ku qufac oo ku hindhis laabatada xusulka gacanta.
- Ha ku dhowaan dadka kale hana gacan qaadin oo hab ha siin.
- Arday badan ayaa iskuulka ku tagta gaadiidka dadweynaha. Haddii ay suura gal kuu tahay inaad si kale ku tagto iskuulka waxan kugu boorineynaa inaad taa sameyso – lug, baaskiil ama sidi kale ee suura gal kuu ah.

## **Warbixin dheeraada**

norrkoping.se ayaad ka heleysaa warbixin dheeraada oo ku khuseysa adiga ay carruuri kuu dhigato dugsiga xannaanada ama iskuul.

>> [Halkan ka aqriso](#)

**Waad ku mahadsan tahay sidaad isu xilqaantay oo aad gacan uga geysatay yareynta faafka cudurka.**

## **Mahadsanidiin**

Xafiiska waxbarashada